

# Caabuqa lakabka dhexe ee darbiga wadnaha kadib COVID-19 Tallaalkiisa: Wuxaa Waalidiinta iyo Dhalinyarada Da'yartu Ay tahay Inay ogaadaan



## Waa Maxay Caabuqa lakabka dhexe ee darbiga wadnuhu?

Caabuqa lakabka dhexe ee darbiga wadnaha iyo caabuqa xuubka ku wareegsan wadnuhu waa erey-bixin loogu talagalay qeexida caabuqa ku dhaca muruqyada wadnaha, ama dhaadhiya dibadda ee ku yaala wadnaha. Calaamadaha guud waxa ku jira shaf xanuuun, adkaanta neefsashada, iyo garaaca wadnaha oo aan caadi ahayn. Nidaamka difaaca jidhka ayaa mararka qaarkood sababa caabuqan isaga oo ka jawaabayn in fekshan kaaso, ay ka mid tahay feyrasyada.

## Caabuqa lakabka dhexe ee darbiga wadnuhu maaha mid aad u caan ah sidoo kale waxyeeladiisu waa mid marar dhif ah keenta dhimasho.

Waxa jira in ka yar 200,000 oo kiis oo ah Caabuqa lakabka dhexe ee darbiga wadnaha guddaha dalka Mareykanka sannad kasta, in ka yar 2% ayaa u dhimata. Intii lagu jiray tijaabada caafimaad ee tallaalka in ka badan 3,000 oo caruur ah da'dooduna u dhaxayso 5 ilaa 11, ayaa aan lagu sheegin warbixintooda in ay ka qaadeen Caabuqa lakabka dhexe ee darbiga wadnaha kadib qaadashada tallaalka.



- Caan kuma aha in uu noqdo mid faafa
- Inta badan kiisaku waa kuwo aad u fudud
- Daaweyntu badanaa waa qaddar yar, waxayna diirada saartaa maareynta calaamadaha (daawo iyo nasasho)

## Ma jiraan xidhiidh kala dhexeeyaa tallaalka COVID-19?

Inkastoo ay tahay mid dhif ah, cadaymuu waxay muujiyeen xidhiidh ka dhexeeyaa tallaalada mRNA COVID-19 iyo Caabuqa lakabka dhexe ee darbiga wadnaha/caabuqa xuubka ku wareegsan wadnaha. Caabuqa COVID-19 ayaa sidoo kale sababa Caabuqa lakabka dhexe ee darbiga wadnaha. Centers for Disease Control and Prevention (CDC, Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada) ayaa shaacisay [daraasad ku](#) saabsan Caabuqa lakabka dhexe ee darbiga wadnaha kadib faafaha COVID-19 caabuqiisa, kaasoo ah mid ka badan kadib qaadashada tallaalka COVID-19. Ma jiraan wax dhimasho ah oo ka timi Caabuqa lakabka dhexe ee darbiga wadnaha ee uu sababay COVID-19 ka tallaalkiisu dalka Mareykanka guddiisa.

## Waa maxay tilmaamaha iyo calaaadaha ay tahay in aan ka digtoonaado kadib tallaalka?

Kiisaku badanaa waxay ku dheecen ragga dhalinyarada ah iyo da'yarta qaangaadhay. Calaamadaha ayaa u muuqda badanaa kuwo yimaada kadib kuurada labaad.

CDC waxay soo jeedinaysaa in dhowaan dadkiil la tallaalyay ay raadsadaan daryeel caafimaad haddii ay la kulmaan in kamid ah calaamadaha kadib istallaalka, gaar ahaan inta lagu jiro toddobaadka koowaad kadib tallaalka:



- Shaf xanuuun
- Neefta oo kugu yaraata
- Dareenka in aad leedahay wadne garaadegdeg ah, lulmasho, ama wadne boodbood

Inta badan bukaanada leh Caabuqa lakabka dhexe ee darbiga wadnaha ama caabuqa xuubka ku wareegsan wadnaha ee helay daryeel ugana jawaab celiyay si fiican daawaynta ayaa dareemay ladhaansho degdeg ah. Bukaanadu waxay awodaan badanaa inay ku noqdaan nolol maalmeedkoodii caadiga ahaa kadib marka calaamadahoodii roonaadeen. Kuwa laga helay Caabuqa lakabka dhexe ee darbiga wadnaha waa in ay la tashadaan dhakhtarkoodii Wadnaha kahor intaanay dib u bilaabin, hawlahoodii sida jimicsiga.

Xasuusnow, waa caadi inaad yeelato waxyeelooyin yar-yar ama meel dhixaada inta lagu guddo jiro toddobaadka ugu horeeya kadib qaadashada noockasta oo tallaalka COVID-19 ah sida xumadda, madax xanuunka, daalka, iyo xanuunka laabatooyinka/muruqa.

## Tallaalka ayaa wali ah dookha ugu wanaagsan.

Faa'iidooyinka ugu awoda badan ee uu leeyahay tallaalku ayaa aad uga badan suurtgalnimada khatareed ee waxyeelada falcelinta tallaalka, sida Caabuqa lakabka dhexe ee darbiga wadnaha. CDC du waxay sii wadaa [in ay ku taliso in qofwalba kaaso ah mid u qalma uu ahaada mid la socda xilliyada qaadashada tallaalka COVID-19 si aad isaga](#) ilaalso COVID-19.



DOH 348-835 September 2023 Somali

Si aad dukumiintigaan oo qaab kale u dalbato, wac 1-800-525-0127.  
Macaamiisha dhagoolka ah ama kuwa maqalkoodu culus yahay,  
fadlan waca 711 (Washington Relay) ama iimayl u dir  
[doh.information@doh.wa.gov](mailto:doh.information@doh.wa.gov).